



Miisaaniyadda loogu talagalay mudnaansiinta waxbarashada muhiimka ah, sinnaanta, wanaaga ardayda ee 2018-19

Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero iyo shaqaalihisa ayaa dhammeystiray miisaaniyadda 2018-19 oo loogu talagalay Dugsiyada Dadweynaha Portland. Miisaaniyadda ka kooban \$655 milyan waxay ka turjumaysaa mudnaansiinta Kormeedaha Guud, oo ay ka mid yihin kordhinta maalgelinta waxbarashada muhiimka ah, sinnaanta shaqaalaha dugsiyada, horumarinta sinnaanta jinsiga, kala duwanaanshaha iyo ka mid noqoshada, iyo ballaarinta badbaadada iyo wanaaga ardayda. Guddiga Waxbarashada ee PPS waxaa la filayaa in ay si rasmi ah miisaaniyadda ugu ansixiso kulankeeda Juun 26-keeda.